



**SOMALI NATIONAL
BUREAU OF STATISTICS**
Federal Republic of Somalia

TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA SOOMALIYA



ABRIIL 2026

Tusaha Sicirka Badeecadaha, Soomaaliya

Hordhac

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) waa tilmaame dhaqaale oo muhiim ah oo hal beeg u ah isbeddelka guud ee isugeynta boqoleyda ee sicirka tafaariiqda ee badeecadaha iyo adeegyada ay iibsadaan qoysaska Soomaaliyeed. Waxay u adeegtaa sida qiyaasta asaasiga ah ee sicir bararka, ayada oo awood u siineysa siyaasad-dejiyayaasha, ganacsiyada, iyo cilmi-baarayaasha si ay u qiimeeyaan isbeddellada ascaarta si ay u sameeyaan go'aamo dhaqaale oo maan-gal ah. Tan iyo Janaayo 2025, TSB-da Soomaaliya ayaa la sii daayay iyadoo la tixgelinayo hal beeg cusub oo laga soo qaatay Sahan Kharashaadka Qoysaska Soomaaliya ee 2022 (SIHBS), iyadoo lagu lifaaqaayo kalasaarida cusub ee kharashka qoysaska (COICOP 2018), kana turjumeyso dhammaan Doladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka ah ee Soomaaliya. qoraal ku saabsan habraaca ayaa lagu soo bandhigi doonaa Bogga Internet-ka ee SNBS.

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) waxaa lagu qeexay sidan:

"Cabirka celceliska Hal beega isbedelka qiimaha tafaariiqda ee ay macaamiishu ku bixiyeen agabka iyo adeegyada mudo cayiman." meelaha ugu muhimsan ee TSB-da loo adeegsan karo waxaa ka mid ah:

- Cabirka Sicir-bararka: Sicir-bararka sannadlaha ah (YoY) wuxuu isbarbar dhigayaa qiimaha hadda ee sanadkan iyo isla qiimahaas sannadkii hore, isagoo u adeegaya sida agab loogu talagalay siyaasadda lacagta iyo maaliyadda.
- Go'aan-qaadasho Dhaqaale: Waxaa isticmaala hay'adaha dawladda, ganacsiyada, iyo hay'adaha caalamiga ah si ay ugu jaan gooyaan mushaharka, qandaraasyada, iyo ka faa'iidooyinka bulshada.
- Falanqeynta Dhaqaalaha Balaaran: Waxay taageertaa qiimeynta awoodda wax iibsiga, hagaajinta qiimaha kharashka-nololeed, iyo xasiloonida dhaqaalaha.

Hab Ururinta Qiimaha:

- Si joogta ah: Waxa loo sameeyaa toddobaadka ugu horreeya iyo kan saddexaad ee bil kasta.
- Deeganada laga soo ururiyo: Muqdisho (Caasimadda), Dhammaan Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka (FMS).
- Ashyaada ama badeecadaha: 537 shey, oo laga soo xulay Sahankii 2022 SIHBS, oo lagu kala saaray nidaamka Kala-soocidda Qaybaha Isticmaalka Qofka (COICOP) 2018 oo ka kooban 13 qaybood.

Istaatistikada Muhiimka ah

- Sannadle (Abriil 2026)

Laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay ilaa Abriil 2026, TSB-da ayaa sare u kacay 8.1%(Wax yar ayay ka sarreysay 7.9% bishii Maarso 2026).Qiimaha kororka ugu weyn ee laba iyo tobankii bilood ayaa ahaa:

- Caafimaadka (+14.5%): adeega daryeelka bukaan jifka (+18.5%), Daawooyin iyo Adeegyada Caafimaadka (+14.9%). Madadaalada, ciyaaraha iyo dhaqanka (+12.7%).
- Makhaayadaha iyo Adeegyada hoyga (+12.2%): Adeegyada Makhaayadaha(+15%), Adeegyada hoyga(+0.02%).
- Adeegyada waxbarashada (+12.2%): xiliga caruurnimada, waxbarashada dugsiga hoose (+14.9%).
- Guryaha, biyaha, korontada, gaaska iyo shidaalka kale(+12.1%): biyaha(+18.3%), korontada(+15.7%).(Qaybtani waxay dardar yeelatay marka loo eego kororkii sannadlaha ahaa ee +8.9% bishii Maarso.)
- cunto iyo cabitaannada(+8.1%): Badarka (+18.5%), Rootiga iyo Waxyaabaha Foornada laga Dubo (+19.8%). Gaadiidka (+6.0%): Qalabka Gaadiidka Shakhsiyeed (+32.4%). (Tani waxay ka xoog badnayd kororkii sannadlaha ahaa ee +4.7% bishii Maarso.)

Ma jirin wax dhaqdhaqaaqyo taban ah intii lagu jiray bishii Abriil 2026.

Kororka heer dowlad-goboleed (laga bilaabo kan ugu sarreeya ilaa kan ugu hooseeya):

Galmudug (+9.9%), Koonfur Galbeed (+9.1%), Puntland (+8.1%) (oo ka kacday +6.5% bishii Maarso), Banaadir (+7.5%), Jubbaland (+6.6%), Hirshabeelle (+6.1%).

Bille (Abriil 2026)

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) waxuu kordhay 1.5% Bisha Abriil. (taas oo ka hooseysay 2.4% bishii Maarso 2026).

- Qiimaha kororka ugu badanaa ee bishan ayaa ahaa: Madadaalada, ciyaaraha iyo dhaqanka (+6.3%). (Koror xooggan marka loo eego +2.2% bishii Maarso). guryaha, biyaha, korontada, gaaska iyo shidaalka kale(+4.9%): korontada (+6.2%), Kirada (+5.5%). Gaadiidka (+4.4%): Adeegyada gaadiidka rakaabka (+7.6%), Shidaalka (+6.8%), (Kobacu wuu yara degey marka loo eego +7.6% bishii Maarso). daryeelka shakhsiga ah, daryeelka bulshada iyo adeegyada yar yar(+3.4%).
- Waxaa hoos u dhacay Makhaayadaha iyo Adeegyada Hoyga (-3.5%). (Waxay ka soo noqotay kororkii +2.6% ee bishii Maarso.), Dharka iyo Kabaha (-2.1%), Adeegyada Waxbarashada (-1.7%).

- Qiima kororka ugu badan ee dawlad goboleedyada wuxuu ka yimid Jubaland (+1.6%) halka Galmudug la diwaangaliyey hoos-u-dhac gaaraya (-1.9%).
- Kororka heer dowlad-goboleed (laga bilaabo kan ugu sarreeya ilaa kan ugu hooseeya):
 jubaland (+5.1%) (soo kabasho xooggan oo ka timid -2.1% bishii Maarso), Banaadir (+2.3%), Puntland (+1.3%),
 Galmudug (+1.2%).

Shaxda 1. TSB, Dhaqdhaqaaqyada Sanadlaha & Billaha ah ee Soomaaliyeed (%)

	Isbedalka Billaha ah (%)	Isbedalka Sanadlaha ah (%)
Abr-26	1.5%	8.1%
Mar-26	2.4%	7.9%
Feb-26	0.1%	5.7%


Warbixinta TSB-da ee Soomaaliyeed – Dhamaan qeybaha TSB-da

Jaantus 1. Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da


Isbedalka boqoleyda ee 12 billood

Tixraca TSB-da

Mudada Tixraaca = 2022



Jaantuska 2. Qeybaha ka qeybqaata (%) heerka sicir bararka (heerka qeybinta)



War bixin Kooban ee Dhaqdhaqaaqa Sannadlaha ah

Muddo 12 bilood ah ilaa Abriil 2026, TSB-da ayaa sare u kacay 8.1%,


Qiimo kororka ugu weyn Laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay ayaa ahaa:

- Caafimaadka(+14.5%): adeega daryeelka bukaan jiiifka (+18.5%) Daawooyin iyo Adeegyada Caafimaadka(+14.9%).
- Madadaalo, Ciyaaraha iyo Dhaqanka (+12.7%): alaabaha madadaalada kale (+10.9%).
- Makhaayadaha iyo Adeegyada hoyga: (+12.2%): Adeegyada hoyga (+0.02%), Adeegyada Makhaayadaha(+15%).
- Adeegyada waxbarashada (+12.2%): xiliga caruurnimada, waxbarashada dugsiga hoose (+14.9%).
- Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska iyo Shidaallada Kale (+12.1%): Biyaha (+18.3%) iyo Korontada (+15.7%).
- Cunto iyo Cabitaannada (+8.1%): Badarka (+18.5%) iyo Rootiga & Waxyaabaha Fournada laga Dubo (+19.8%).
- Gaadiidka (+6.0%): Qalabka Gaadiidka Shakhsiyeed (+32.4%).

Intii lagu jiray bishii Abriil 2026, ma jirin wax dhaqdhaqaaqyo taban ah.

Shaxda 2. boqolkiiba isbeddelka heerka qaybta sannadlaha ah

Qaybinta	% - isbeddel sannadle ah		
	Feb-26	Mar-26	Abr-26
WADARTA GUUD EE TSB-da	5.7%	7.9%	8.1%
01 - CUNTO IYO CABITAANNADA	7.8%	8.0%	8.1%
02 - TUBAAKADDA	1.3%	2.3%	2.2%
03 - DHARKA IYO KABAHA	4.7%	6.9%	3.5%
04 - GURYAHA, BIYAHA, KORONTADA, GAASKA IYO SHIDAALKA KALE	4.5%	8.9%	12.1%
05 - AGABKA, AGABKA GURIGA IYO DAYACTIRKA GURIGA EE JOOGTADA AH...	6.1%	6.3%	5.8%
06 - ADEEGA CAAFIMAADKA	12.2%	13.7%	14.5%
07 - GAADIIDKA	-3.2%	4.7%	6.0%
08 - MACLUUMAADKA IYO ISGAARINTA	1.2%	5.1%	4.4%
09 - HAWA BEDELESHO, CIYAARAHA IYO DHAQANKA	4.5%	6.5%	12.7%
10 - ADEEGYADA WAXBARASHADA	14.9%	14.9%	12.2%
11 - MAQAAYADAHA IYO ADEEGYADA HOYGA	12.8%	20.9%	12.2%
12 - CAYMISKA IYO ADEEGYADA MAALIYADA	1.6%	3.1%	2.9%
13 - DARYEELKA SHAKHSIGA AH, DARYEELKA BULSHADA IYO ADEEGYADA YAR YAR...	1.2%	2.9%	4.8%

Jaantus 3. Heerka qeybinta isbedelka boqoleyda ee Sanadlaha ah

Warbixin Kooban ee Dhaqdhaqaaqa Billaha ah

TSB-da ayaa bishan sare u kacday 1.5% intii lagu jiray bishii Abriil 2026.

Dhaqdhaqaaqyada sare u kac ee ugu badan ayaa ka yimid:

Madadaalo, Ciyaaraha iyo Dhaqanka (+6.3%).

Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska iyo Shidaallada Kale (+4.9%): Korontada (+6.2%) iyo Kirada (+5.5%).

Gaadiidka (+4.4%): Adeegyada gaadiidka rakaabka (+7.6%) iyo Shidaalka (+6.8%).

Daryeelka Shakhsiyeed, Ilaalinta Bulshada iyo Waxyaabaha Kale (+3.4%).

Hoos u dhaca ayaa ahaa:


Makhaayadaha iyo Adeegyada Hoyga (-3.5%). Dharka iyo Kabaha (-2.1%).

Adeegyada Waxbarashada (-1.7%).

Shaxda 3. heerka qaybta boqolkiiba isbeddelka bishii

Qaybinta	%beddel bishiiba		
	Feb-26	Mar-26	Apr-26
Wadarta guud ee CPI	0.1%	2.4%	1.5%
01 - CUNTO IYO CABITAANNADA	-0.1%	0.6%	0.8%
02 - TUBAAKADDA	0.6%	2.3%	0.2%
03 - DHARKA IYO KABAHA	1.5%	2.9%	-2.1%
04 - GURYAHA, BIYAHA, KORONTADA, GAASKA IYO SHIDAALKA KALE	-1.1%	5.5%	4.9%
05 - AGABKA, AGABKA GURIGA IYO DAYACTIRKA GURIGA EE JOOGTADA AH...	4.9%	0.4%	1.5%
06 - ADEEGA CAAFIMAADKA	0.8%	3.1%	2.1%
07 - GAADIIDKA	-1.5%	7.6%	4.4%
08 - MACLUUMAADKA IYO ISGAARINTA	-3.7%	1.5%	-0.3%
09 - HAWA BEDELESHO, CIYAARAH IYO DHAQANKA	0.6%	2.2%	6.3%
10 - ADEEGYADA WAXBARASHADA	1.2%	2.0%	-1.7%
11 - MAQAAYADAHA IYO ADEEGYADA HOYGA	3.4%	2.6%	-3.5%
12 - CAYMISKA IYO ADEEGYADA MAALIYADA	0.1%	1.3%	-0.2%
13 - DARYEELKA SHAKHSIGA AH, DARYEELKA BULSHADA IYO ADEEGYADA YAR YAR...	1.2%	2.0%	3.4%


Jaantus 4. Heerka qeybinta isbedelka boqoleyda ee Billaha ah




WARBIXINTA TSB-DA SOOMAALIYEED – ISBARBARDHIGA DOWLAD GOBOLEEDYADA

Tixraaca 5. Tixraaca TSB-da ee heer Dowlad Goboleed (a)

Mudada Tixraaca = 2022



Jaantuska 6. Qeybaha ka qeybqaata (%) heerka sicir bararka (heer Dowlad Goboleed) (a)



(a) Tixraaca Puntland waa la qiyaasay

War bixin Kooban ee Dhaqdhaqaaqa Sanadlaha ah

Mudada 12 bilood ee la soo dhaafay ilaa Abriil 2026 TSB-da, dhaqdhaqaaqyo sare u kac ah ayaa ka yimid:

- Galmudug (+9.9%): Daryeelka shakhsi ahaaneed, ilaalinta bulshada iyo alaabaha iyo adeegyada Adeegayada yar (+12.4%), Cunto iyo cabitaanno (+11.16%), Caymis iyo adeegyadao maaliyadeed (+11.0%).
- Koonfur-Galbeed (+9.1%): Cunto iyo cabitaanno (+4.3%) – badar, rooti & waxyaabaha rootiga laga sameeyo, hilibka.
- Puntland (+8.1%): Adeegyada maqaayadaha iyo hoyga (+12.2%) – adeegyada makhaayadaha. Guryaha (+12.1%) – koronto, kiir. Gaadiidka (+6.0%) – adeegyada rakaabka, shidaal.
- Banadir (+7.5%): Adeegyada waxbarashada (+30.4%). Adeegyada maqaayadaha iyo hoyga (+23.5%). Guryaha (+18.1%).
- Jubaland (+6.6%): Adeegyada maqaayadaha iyo hoyga (+39.0%). Caafimaadka (+27.1%). Macluumaadka iyo isgaarsiinta (+13.3%).
- Hirshabelle (+6.1%): Gaadiidka (+67.6%) – adeegyada rakaabka, shidaal. Daryeelka shakhsi ahaaneed, ilaalinta bulshada iyo alaabaha iyo adeegyada Adeegayada yar (+63.1%).

Intii lagu jiray bishii Abriil 2026, ma jirin wax dhaqdhaqaaqyo taban ah.


Shaxda 4. Boqolkiiba isbeddelka heerka gobolka

Gobolka	% - isbeddel sannadle ah		
	Feb-26	Mar-26	Abr-26
Wadarta guud ee CPI	5.7%	7.9%	8.1%
BANAADIR	6.0%	8.9%	7.5%
PUNTLAND	2.9%	6.5%	8.1%
GALMUDUG	8.0%	8.8%	9.9%
HIRSHABELLE	5.5%	6.1%	6.1%
JUBALAND	5.2%	7.4%	6.6%
KOONFUR-GALBEED	7.0%	9.4%	9.1%

(a) Tixraa Puntland waa la qiyaasay

Jaantuska 7. isbedelka boqoleyda ee Sanadlaha ah ee heer Dowlad Goboleed

Jaantuska 7. isbedelka boqoleyda ee Sanadlaha ah ee heer Dowlad Goboleed



(a) Tixraa Puntland waa la qiyaasa

War bixin Kooban ee Dhaqdhaqaaqa Billaha ah

Intii lagu jiray bishii Abriil 2026, dhaqdhaqaaqyo hoos u dhac ah ayaa ka yimid:

Jubaland (+5.1%): Madadaalada, ciyaaraha iyo dhaqanka (+22.3%). Cabitaannada kulul (+11.2%).

Banadir (+2.3%): Madadaalada, ciyaaraha iyo dhaqanka (+8.0%). Caafimaadka (+7.1%). Daryeelka shakhsi ahaaneed, ilaalinta bulshada iyo alaabaha iyo adeegyada yar (+6.6%).

Puntland (+1.3%): Guryaha (+5.8%) – koronto, kiro. Gaadiidka (+7.6%) – adeegyada rakaabka, shidaal.

Galmudug (+1.2%): Daryeelka shakhsi ahaaneed, ilaalinta bulshada iyo alaabaha iyo adeegyada yar (+3.3%).

Gaadiidka (+2.7%). Caafimaadka (+1.9%).

Hirshabelle (+0.9%): Guryaha (+11.9%) – koronto, kiro. Madadaalada, ciyaaraha iyo dhaqanka (+10.2%).


Koonfur-Galbeed (-1.0%): Hoos u dhac , balse waxaa jiray koror ku yimid: Guryaha (+6.3%) – koronto, kiro. Gaadiidka (+6.1%) – adeegyada rakaabka.

Shaxda 5. Heer gobol ayaa isbeddelay boqolkiiba bishii

Gobolka	%beddel bishiiba		
	Feb-26	Mar-26	Apr-26
Wadarta guud ee CPI	0.1%	2.4%	1.5%
BANAADIR	0.5%	2.8%	2.3%
PUNTLAND	0.2%	2.9%	1.3%
GALMUDUG	-1.8%	9.6%	1.2%
HIRSHABELLE	0.4%	-0.6%	0.9%
JUBALAND	1.6%	-2.1%	5.1%
GOBOLKA KOONFUR-GALBEED	-0.1%	3.0%	-1.0%

(b) Tixraaca Puntland waa la qiyaasay

Jaantuska 8. isbedelka boqoleyda ee billaha ah ee heer Dowlad Goboleed



(a) Tixraaca Puntland waa la qiyaasey